# Xaashida Xaqiiqda

## MASRUUFKA XAASKA

Xaashidan Xaqiiqda waxay bixisaa macluumaadka guud ee ku saabsan taageerada lamaanaha ee waafaqsan *Xeerka Furriinka*.

Waxa *Xeerka Furriinka* lagu dabaqaa lamaanaha is qaba kuwaas oo is furraya. Sharci goboleedyada ama dhuleedyada waxaa lagu dabaq kuwa aan is qabin ama lamaanaha sharciga guud kuwaas oo kala maqnaanaya iyo lamaanaha is qaba ee kala maqnaanaya laakiin aan is furrayn.

**Waa maxay masruufka xaasku?**

"Masruufka xaaska" waa lacagta hal lamaane uu siinayo lamaanaha kale wixii ah taageerada dhaqaale ee raacsan kala maqnaashaha ama furriinka. Wakhtiyada qaarkood waxaa loogu yeedhaa "masruufka" ama "wadista qoyska." Masruufka qoyska caadi ahaan waxaa lacagta loo siiyaa qaab bile ah, laakiin waxaa la siin karaa lacag badan oo israacsan.

**Sababtee hal lamaane loo ga baahan yahay inuu bixiyo masruufka lamaanaha kale.**

Lamaanahu waxa uu bixinayaa teegeerada xaaska haddii lacag bixintan ay buuxiso hal ama wax ka badan ujeedooyinka masruufka qoyska ee lagu qeexay *Xeerka Furriinka*. Waxay yihiin

- Si loogu magdhabo xaas, kaas oo u hurra kartidiisa ama keeda uu ku shaqaysan lahaa dakhli muddada guurka.
- Si loogu magdhabo xaaska daryeelka socda ee carruurta, ka badan ama ka saraysa waajibaadka masruufka ilma kasta; ama,
- Si looga caawiyo xaas baahi dhaqaale oo ka timid burburka guurka.

Isla markaas lamaanaha hela taageerada waxay leeyihiin waajibaadka ay ku noqdaan kuwa iskood isku taageera hadii ay macquulka tahay.

**Kumaa codsan kara masruufka xaaska?**

Marka lamaane is qabaa ay is furraan, mid uun lamaanaha ayaa codsan kara masruufka xaaska si waafaqsan *Xeerka Furrinka*. Xaaladaha badankooda, masruufka qoyska waxaa codsada lamaanaha leh dakhliga hoose. Xaalad kasta, waa in uu

garsoore tixgeliyaa dhowr arimoood  si uu go'aan uga gaadho in masruufka xaaska la bixiyo iyo in kale, oo ay ka mid tahay:

- Qaababka dhaqaale, baahiyaha iyo duruufaha labbada lamaane;
- Inta ay leegtahay wakhtiga lamaamahu ay wada noolaayeen;
- Doorarka lamaana kasta muddada guurka;
- Saamaynta doorarka iyo burburka guurka ee labbada lamaane xaaladooda dhaqaale ee hadda.
- Masuuliyadaha joogtada ah ee daryeelka carruuurta, haddii ay jiraan wax;
- Amaro hore oo kasta, heshiisyo ama qaban qaabyo horay looga sameeyay masruufka xaaska.

**Sidee masruufka xaaska loo xisaabiyaa?**

Xisaabinta masruufka xaaska waa mid ka mid ah dhinacyada ugu adag ee sharciga qoyska. Arimo badan ayaa u baahan in la tixgeliyo si go'aan looga gaadho qadarka xaqa ah ee ku habboon xaalad kasta. Maxkamaddaha Kanadda intooda badan iyo xirfad layaasha sharciga qoysku waxay isticmaalaan *La talinta masruufka xaaska* markay xisaabinayaa masruufka xaaska. Si ka duwan *Hagitaanada Masruufka Carruurta ee Federaalka*, Tilmaamaha *La talinta masruufka xaaska* maaha sharci. Waxay ka caawiyaan xisaabinta qadarka lacagta ee ku haboon taageerada xaaska, haddii ay tahay amarada maxkamadda ama heshiisiin ama heshiisyo ka baxsan maxkamadda.

**Ma isticmaali karaa Hagitaanada La talina Masruufka Qoyska laftaydu si aan u xisaabiyo masruufka qoyska?**

Waxa *La talinta masruufka xaaska* loo heli karaa qof kasta si loola taliyo. Si kastaba ha ahaatee, maadaama xisaabinta masruufku xaasku uu aad u adag yahay, aad ayay muhiim u tahay in lala tashado xirfad yaqaanka sharciga qoyska

**Sidee sharciyada canshuurta loogu dabaqaa masruufka xaaska?**

Wakaalada Dakhliga Kanada Waxay haysaa macluumdka kaa caawinaya inaad go'aan ka gaadho sida lacagta taageerada ee aad bixiso ama aad hesho loogu darayo ama looga jarayo dakhligaaga ku saabsan cashuur celinta dakhligaaga.

**Ma waajib baa in aan bixiyo masruufka carruurta iyo kan xaaska isku wakhti?**

Xaalado badan, dadka waxay bixiyaan masruufka carruurta iyo kan xaaska isku wakhti labadoodaba. Si kastaba ha ahaatee *Xeerka Furriinka* waxa ay ahmiyada saartaa masruufka carruuurta. Tan macnaheedu waxa weeye xaaladaha halka aanay jirin lacag ku filan oo dadku bixiyaan masruufka carruurta iyo xaaska labadaba, lacagta waxaa la faraa in lagu bixiyo masruufka carruurta ugu horayn.

**Intee in le'eg ayaa masruufka xaaska la bixin doonaa?**

Muddada taageerada waxay ku salaysnaan doontaa xaqiiqooyinka xaalada, sida muddada wakhtiga lamaanahu ay wada noolaayeen, ama da'dooda wakhtiga kala maqnaanshaha. Xaaladaha qaarkood, taageerada lamaanaha waxaa keliya lacagta la siin doonaa wakhti xadidan. Xaaladaha kale, masruufka xaaska wuu sii soconayaa ilaa in uu isbeddel duruufta ah yimaado mooyee oo maxkamaddu ay samaysa amar kaa ka duwan ama heshiiska ayaa la cusboonaysiiyay si uu u muujiyo isbeddelka.

**Markee ayaan jooojin doonaa bixinta masruufka xaaska?**

Haddii aad bixinayso masruufka xaaska kaasoo lagu dejiyay heshiis qoran ama amarka maxkamadda, waa inaad sii wadaa bixinta ilaa iyo inta:

- Amarka ay beddesho maxkamaddu;
- Adiga iyo lamaanahaagii hore aad aqbashaan inaad beddeshaan heshiiskaaga; ama
- Xaaladaha joojinta lacag bixinta, sida lagu qeexay amarka kaxkamada ama heshiiska, oo la buuxiyay.

Maxkamaddu waxay keliya beddeli kartaa amarka masruufka xaaska marka la xaqiijiyo isbeddel muhiim ah oo ka dhacay duruufaha mid uun lamaanaha. Tusaale ahaan, haddii bixiyaha lacagta taageeradu uu waayo shaqadiisa ama shaqadeeda ka dib marka amarka taageerada la sameeyay oo isaga ama iayaddu aanu bixin karin qadarka la dalbaday, maxkamadda markaas waxay go'aan ku gaadhi kartaa in amarka taageerada la beddelo.

Haddi adiga iyo lamaanahaagii hore aad leedihiin heshiiska masruufka xaaska, oo mid uun isbeddel kala kulmo duruufahaaga, waxaad dooran kartaa inaad beddesho heshiiskaaga si aad u muujiso xaaladaada cusub. Si kastaba ha ahaatee, adiga iyo lamaanahaaga hore labadiinu waxaad u bahaan doontaan inaad oggolaataan wixii isbeddelo la soo jeediyay oo heshiiskaaga ah ka hor inta aanay saamayn yeelan.

Haddii amarkaaga ama heshiisku si cad u sheego in masruuf xaas uu soo af jarmayo taariikh gaar ah ama dhicitaanka dhacdo gaar ah, markaa lacag bixinta taageerada waxay joogsan kartaa wakhtigaas. Tusaale ahaan, haddii amarkaaga ama heshiisku si gaar ah u qeexayo in masruufka xaaska uu dhammaanayo Diisambar 1deeda sanadka 2020, markaa waajibaadka masruufkaaga qoyska waxa uu dhammaanayaa wakhtigaas.

***Baro waxbadan oo ku saabsan macluumaadka xorta ah ee ku saabsan furriinka iyo kala maqnaanshaha laga heli karo Cadaaladda Canada fiidyowgan gaaban, ama booqo websaydkayaga:***

## ***Canada.ca/family-law***

**Afeef:** Tani ma ahan qoraal sharci ah oo ma bixisnayso talo sharci ah. Maadaama sharciga qoysku u adkaan karo, caadi ahayn waxay u fiicantahay shakhsiyaadka inay helaan talo ku saabsan xaaladooda oo ka timid qareenka sharciga qoyska. Qareenadan ayaa ah meesha ugu wanaagsan ee aad ka heli karto talo sharci oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka. Ururada qareenada ee gobolada iyo deegaanka badankoodu waxay bixiyaan Adeegyada Gudbinta Qareenka. Qareenada qaarkood waxaa laga yaabaa inay bixiyaan la tashi hore oo bilaash ama mid raqiis ah, ama shakhsiyaadka ayaa go'aan ka gaadhi kara inay dhowr jeer la tashadaan qareen si ay uga caawiyaan dhowr dhinac oo kamid ah xaaladooda gaarka ah